



# Turjubaano ayaa la helayaa loogu talagalay kulamada macallinka-waalidka

Iyada oo kulamada macallinka-waalidka ay soo dhow yihiiin, waa muhiim in la ogaado in PPS ay bixiso adeegyada turjumaadda oo lacag la'aan ah iyo ilo kale oo loogu talagalay qoysaska luqad ahaan kala duwan. Haddii aad u baahan tahay turjubaan loogu talagalay kulamada, la qaban doono Noofambar 25-26, la socodsii dugsigaaga.

Halkan waxaa ku qoran talooyin faa'iido leh oo wax ku ool ah oo uu bixiyay xafiiskayaga Adeegyada Luuqadda.

**Ha kor** kulamada macallinka-waalidka – diyaar ahow:

- Diyaarso su'aalaha loogu talagalay kulamada macallinka-waalidka. Su'aaluuhu waxay noqon karaan kuwo ku saabsan barnaamijka, sida ilmuuhu yahay, shaqada guri, taageerada jirta ee uu heli karo ardaygaagu, siyaasadaha iyo nidaamyada dugsiga ama fasalka.

TALOOYIN: Qoyskaagu wuxuu isticmaali karaa warqadaha ay ku qoran yihiiin "["Talooyin loogu talagalay Kulanka Waalidka-Macallinka oo guulaysta"](#)", kuwaasi oo la heli karo iyaga oo ku qoran shan luqaddeed oo la taageero.

**Inta lagu jiro** kulanka macallinka-waalidka – diyaar noqo:

- Soo qaado su'aalahaaga isla markaana su'aalahaaga la wadaag turjumaanka. Turjumaanka la socodsii inaad qorshaynayo inaad su'aalahani weydiiso macallinka.
- Macallinka la socodsii haddii aad bedeshay macluumaadka lagaala soo xiriirayo. Macallimiintu waxay ku tiirsan yihiiin macluumaadka aad bixiso si laguula soo xiriiryo. La socodsii iyaga haddii uu jiro wakhti aad doorbidayso in laguula soo xiriiryo.

**Ka dib** kulanka macallinka-waalidka – la socod samee:

- Bilaw qorshaha waxqabad ee u dejiyay macallinku. Hadba sida dhakhsaha leh ee ilmahaagu u bilaabo ka shaqeenta qorshahan, waxaad si dhakho leh u arki doontaa horumar la sameynayo. Haddii aad awoodi weydo inaad raacdo qorshaha, weydiiso macallinka si loo helo wax bedel u noqonaya. Kuwaasi waxaa ka mid noqon kara, waxbarid, seminaaro, iyo adeegyada kale ee taageerada ardayga oo laga bixiyo PPS.
- Weydiiso su'aalaha ku saabsan wada xiriirka mustaqbalka ee lala yeelanayo macallinka.

Waxaan rajeynaynaa in aan taageerno bulshada luqad ahaan iyo dhaqan ahaan kala duwan marka la joogo PPS ee lagu jiro kulamada macallinka-waalidka ee 2019-ka!

